



Börja förskoleklass Somaliska

Bilaabaya iskuulka

Carruurta waa inay bilaabaan iskuul sannadka ay buuxiyaan lix sano. Iskuulku wuxuu bilaabanayaa bisha ogosto. Sannadka koowaad ilmuhu wuxuu dhiganayaa fasalka farbaradka (ebraad).

Dhammaan carruurta bilaabaya fasalka farbaradka waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan iskuul ugu badnaan labo kilomitir gurigooda u jira. Haddii iskuullo badan ay labo kilomitir gurigooda u jiraan, wuxuu ilmahaagu xaq u leeyahay inuu dhigto mid ka mid ah afarta iskuul ee ugu dhow guriga.

Ma sheegi karno iskuulka ilmahaagu dhigan doono. Waxay ku xiran tahay haddii dad badan ay rabaan inay isku iskuul dhigtaan iyo meesha ilmuhu deggan yihiin.

Waxaad codsan kartaa iskuulka aad la jeceshahay ilmahaagu inuu dhigto. Waxaad sidoo kale codsan kartaa iskuullada aad rabtid.

Inaad codsatid iskuul kama dhigna in la hubo in ilmahaagu iskuulkaas heli doono.

Waxaad codsan kartaa iskuul inta u dhexaysa 15 jenawari- 15 feberwari.

Ku fekar haddii ilmahaagu labo waalid leeyahay inay khasab tahay labaduba inay soo oggolaadaan codsiga. Haddii kale ma ansaxayo.

Kasii akhri wixii intaa dheer oo ka codso iskuul www.goteborg.se/onskaskola.

Haddii aad su'aalo qabtid naga lasoo xiriir

Telefoon: 031-365 09 60

E-mail: grundskola@grundskola.goteborg.se